



## **Qorshaha Kaalmada Dhaqaale – Luuqad Cad oo Kooban**

Waxaan siinaa kaalmo dhaqaale bukaanadeena kuwaas aan bixin Karin gebi ahaan ama qayb ka mid ah biilashooda caafimaadka. Waxaad ka codsan kartaa kaalmo adigoo u marayo mid ka mid ah labadeena barnaamij ee kaalmadeena dhaqaale: Daryeelka Sadaqada ama Shuraakada Sarre. Barnaamijyadan waxay badanaa daboolaan kharashka adeegeena rugaha caafimaadka iyo isbitaallada.

### **Waa maxay Daryeel Samafal?**

- Waxaad u qalmi kartaa daryeel qiimo-dhimis iyadoo lagu salaynayo dakhliga qoyska iyo raasumaalka (sida guri ama gaari). Dakhligaagu wuxuu gaari karaa mid u dhow saddex jibaar (300%) Heerka Saboolnimada Federaalka.
- **Caymisyada:** Daryeelka degdega iyo caafimaadka
- **Aan daboolin:** Adeegyada ka baxsan shabakada (adigoo ku salaynaya caymiskaaga) ama daryeel ay bixiyaan dhakhaatiir aan aheyn Fairview ama HealthEast

### **Sidee u codsadaa?**

Si aad u codsato, wac hal kamid ah lambarada hoos ku qoran. Waxaan ku soo diri doonaa fariin ay la socto liiska ka kooban dokumeentiyada loo baahanyahay (waxaad u baahan doontaa inaad caddeyso dakhligaaga iyo hantidaada). Waxaad sidoo kale barteena ka daabacan kartaa codsi. Waxaad sidoo kale tegi kartaa miiska xoghaynta isbitaalka ama wici kartaa la-taliye dhaqaale si uu kaaga caawiyo hanaanka codsiga isbitaalka aad ka heshay daryeelka.

Si aad u hesho nuqulka Qorshaha Kaalmada Dhaqaale ee Fairview iyo HealthEast ama aad u hesho Daryeel Samafal, booqo barteena [www.fairview.org/charitycare](http://www.fairview.org/charitycare) ama wac lambarada adeega macaamiisheena ee hoose:

Adeegyada Isbitaallada Fairview Health	612-672-6724
Isbitaallada HealthEast	651-232-1100

### **Waa maxay Shuraakada Sarre?**

Barnaamijkan waxaa loogu talagalay dadka degan Minnesota ee Medicare Part A iyo Part B. Barnaamijka wuxuu ka caawinayaa caymiska iyo bixinta lacagta caymiska iyo magdhawga. Si aad wax badan uga ogaato, wac , 952-767-0665 ama booqo bartabarteena [www.seniorcommunity.org](http://www.seniorcommunity.org).

**Uruurinta Deynta Caadiga ahayn:** Fairview ma qaadi doonto dacwo ama xukun maxkamadeed uruurinta deynta caadiga ahayn (ECA) innagoo u marayno shirkadeena sharci ilaa dadaalada macquulka ah la buuxiyo ee kuwa laga yaabo inay u qalmaan kaalmo dhaqaale.

**Guud Ahaan Lacagta Biilka ah ee Lagusoo Dallaco:** Bukaanada u qalma kaalmo dhaqaale lagama qaadi doono inta ka badan kharashka Xaddiyada kharashka ee guud ahaan lagusoo dallaco (AGB) ee bukaanada caymiska haysta. Waxaad ka heli kartaa macluumaadkan barteenabarteena ama waxaad heli kartaa nuqul bilaash adigoo wacayo lambarada tixraaca sarre.

**Tarjumaad:** Waxaan ku haynaa tarjumaada xeerkaani af Isbaanish, Ruush, Vietnamese, Karan, Hoomong iyo Somali. Waxaad ka heli kartaa barteenabarteena ama waxaad heli kartaa nuqul bilaash adigoo wacayo lambarada tixraaca sarre.